



Available in different languages:

- ✓ Somali
- ✓ Polish
- ✓ Urdu
- ✓ Punjabi
- ✓ Hindi
- ✓ Gujarati
- ✓ Bengali
- ✓ Romanian

STOMP

**Joojinta daawo ka badan intii
loogu tala galay ee dadka qaba
naafonimo dhanka waxbarashada
ah, autismka ama labadaba**

**Qofwalba u wada shaqeynaya si wadajir ah
si loo joojiyo isticmaalka xad dhaafka ah ee
daawooyinka xaaladaha caafimaad ee maskaxda
iyo si loo horumariyo tayada nolosha ee dadka.**



Waa maxay STOMP?

STOMP



STOMP waa mashruuc ka socda England si loo joojiyo isticmaal ka badan intii loogu tala galay ee daawooyinka xaaladaha caafimadka maskaxda.

Waxa jira macluumaad dheeraada oo ku saabsan daawooyinkan boga xiga.

Daawooyinkani waxa loo isticmaalaa in lagu daweeyo xaaladaha caafimaad ee maskaxda. Mararka qaar waxa la siiyaa dadka sababtoo ah waxa loo arkey in hab dhaqankooda ama dabcigoodu uu ku yahay caqabad.

Dadka leh ama qaba naafonimo dhanka waxbarashada ah, autism ka ama labadaba ayay u badan tahay in la siiyo dawooyinka ka dibna dadka kale.



Daawooyinkani waxay ku haboonyihiin dadka qaarkood. Waxay ka caawin dadka inay ku joogaan badbaado iyo fiicnaan. Mararka qaarkood waxa jira wadooyin kale oo lagu caawin karo dadka, markaa waxay u baahanyihiin daawo yar, ama waxbaba.



STOMP waxa ay ku saabsan tahay in qofwalba loo wada shaqeeyo si wada jir ah si dadku ay u helaan daawada saxda ah marka ay u baahan yihiin.

Sidoo kale waxa ay ku saabsan tahay in la hubiyo ama hubaal laga dhigo in dadku ay helaan taageerada kale ee ay u baahan yihiin. Tan macnaheedu waxa weeyaan uma badna in ay u baahdaan daawada noocan ah.

STOMP waxa ay ku saabsan tahay ka caawinta dadka inay wanaagsanadaan oo ay helaan nolol fiican oo tayo leh.

STOMP

Ku saabsan daawooyinka xaaladaha caafimaadka maskaxda



Daawooyinka xaaladaha caafimaadka maskaxda waa koox daawooyin ah kuwaasoo badala qaabka ama sida ay maskaxdu u shaqayso,

Waxa loo isticmaalaa xaaladaha caafimaad ee maskaxda sida dhimirka, walaaca iyo niyad jabka. Sidoo kale waxa loo isticmaalaa in ay ka caawiyaan dadka in ay seexdaan. Sidoo kale waxa ku jira daawooyinka loogu talagalay qalalka ama suuxdinta. Mararka qaar daawooyinkan waxa loo isticmaalaa in ay badalaan qaabka ay dadku u dhaqmaan. Xataa marka aanay qabin xaalad caafimaad oo maskaxda ah ama qalal.



Caafimaadka Bulshada England waxa ay leeyihiin ama ay sheegayaan in maalin walba ku dhawaad 30,000 ilaa 35,000 oo dadka waaweyn ah ee qaba naafonimo dhanka waxbarashada ah ay qaataan daawooyinka xaaladaha caafimaadka maskaxda, iyagoo aan qabin xaaladihii caafimaad ee daawada loogu tala galay. Caruurta iyo dadka da, da yar ayaa sidoo kale loo qoraa.



Daawooyinka dhanka xaaladaha caafimaadka maskaxdu waxa ay sababi karaan dhibaatooyin marka ay dadku qaataan mudo dheer. Ama ay qaataan xadi ama qiyaas aad u sareysa. Ama ay u qaataan sabab qaldan. Tani waxa ay keeni kartaa dhibaatooyin sida

- In miisaanku kordho
- Dareemid daal ama 'hab dhaqan aan cadhi ahayn'
- Dhibaatooyin halis ah oo jidh ahaaneed.

Inta badan waxa jira wadooyin kale oo lagu caawin karo dadka, Markaa waxay u baahanayaan daawo yar.



- **Ha badalin qiyaasta ama xadiga daawooyinkan ama ha joojin qaadashadooda adigoo aan la hadlin dhakhtarkaaga.**
- **Dhakhtarkaaga iyo dadka ku taageera adiga ayaa ku caawin doona.**

STOMP

U helo si sax la iigu tala galay aniga



- Ila shaqee aniga iyo dadka aniga I taageera. Qoyskayga, dhakhtarka iyo kuwa kale si aan daawaynteyda ugu helo si sax ah



- Hubi in aan haysto dib u eegista daawada oo joogta ah



- Iga caawi in aan ka war hayo caafimaad kayga jidh ahaaneed

- Hubi in aan u qaato daawoyinka xaaladaha caafimaadka maskaxda sababta saxda ah, qiyaasta saxda ah iyo wakhtiga ugu gaaban ee suurtagalka ah



- Hel wadooyin kale oo iga caawiya in aan ku joogo fiican iyo badbaado

- Isii macluumaad aan fahmi karo markaa waan ogahay waxa macnahoodu yahay waxaan waydiin karaa suaalo



- Iga qayb gali go, aanada ku saabsan daryeel kayga iyo daawaynta

- Sii qoyskayga iyo daryeelayaasha macluumaadka iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay ii caawiyaan aniga.

Siyaabaha loo taageero dadka



- Sameynta qorshayaasha qofka-dhexe ee dadka, qoyska, daryeelayaasha, shaqaalaha iyo kuwa kale
- Fahamka marka iyo sababta ay qof u heysato dhibaato iyo wax waxa ka caawin kara iyaga inay raystaan ama fiicnaadaan
- Caawinta dadka iyo kuwa iyaga taageeraya in ay fahmaan oo ay maamulaan daawadooda
- Laga dhigo macluumaadka kuwa fudud si loo fahmo
- La siiyo taageero la xidhiidha isgaarsiinta hadii loo baahdo, sida in laga qayb galiyo qofkasta sameynta qorshaha isgaarsiinta
- Laga caawiyo dadka in ay ku joogaan caafimaad fiican, sida caafimad qab iyo inay aadaan baadhitaano caafimaad
- Caawinta Adeegsiga hab dhaqan wanaagsan si dadka loogu caawiyo inay badalaan qaabka ay u dhaqmaan iyo sida loo taageerayo
- Isticmaalka daawanta 'dhawaaqa', daawaynta hadalka, daawaynta shaqada ama firfircoonida, iyo daawaynta farshaxanka
- Hubaal in laga dhigo daryeelayaasha qoyska iyo shaqaalaha sidoo kale inay helaan taageerada ay u baahan yihiin.

Sheeko ku saabsan Aaliyah



Sheekadani waxa ay ku saabsan tahay qof dhab ah, laakiin magaca qofka waa la badalay. Qofka ku jira sawirka ayaa matalay ama jilay qaybtii Aaliyah riwaayad ama filin uu sameeyey MiXit



Markii Aaliyah ay usoo guurtay guriga cusub waxa ay ka dhigtay iyada mid culeys badan. Dadkii waxa ku adkaatay in ay iyada caawiyaan. Aakhirkiina dhakhtarka ayaa loo dhigay sababtaa awgeed. Aaliyah waxa ay qaadanaysay shan daawo oo kala duwan oo ah dawooyinka xaaladaha dhanka maskaxda inkastoo aanay qabin xaalad caafimaad oo maskaxda ah. Tani waxa ay dhigtay iyada in miisaankeedi kordho waxaana ku bilaabmay dhibaatooyin caafimaad.



Markii Aaliyah ay kasoo baxday dhakhtarka, iyada iyo qoyskeedu waxa ay la shaqeeyaan GP gooda, dhakhtarka waalida ama dhimirka ee deeganka iyo ka cilmu nafsiga.



GPgu waxa uu meel isugu geeyey qorshe daryeel caafimaad.

Si wadajir ah dhamaantood waxa ay ka shaqeeyeen dhimtaanka ama yareynta daawooyinka Aaliyah. Kooxdeeda daryeelka iyo qoyskeeda waxa ay barten taageero ku saabsan hab dhaqanka fiican. Waxa kale oo ay barten wadooyin kale oo iyada lagu caawin karo. Wakhtiga iyo taageerada ay ka heshay qof walba, Aaliyah waxa ay bilawday in ay fiicnaato.

Aaliyah hada uma baahna daawooyinka. Waxa ay ku dhexhaysataa bulshada dhexdeeda nolol caafimaad leh, farxad leh oo aamin ah.

Badalaya sida wax loo sameeyo



STOMP waxa ay ku saabsan tahay badalaada qaabka wax loo sameeyo ee sanada badan oo iman doona. Ururo faraban oo la shaqeeya dadka kuwaasoo bixiya adeegyo balaadhan oo ah caafimaadka iyo daryeelka bulshada.

STOMP La hawlgalayaasha



- NHS England = ADEEGA CAAFIMAADKA QARANKA England
- Royal College of Nursing = Kuleejka Royaal ee Kalkaalinta
- Royal College of Psychiatrists = Kuleejka Royal ee Xanuunada Dhimirka
- Royal College of GPs = Kuleejka Royal ee Dhakhaatiirka Guud
- Royal Pharmaceutical Society = Bulshada Royal ee Daawooyinka
- British Psychological Society = Bulshada Royal ee Cilmu nafsiga
- oluntary Organisations Disability Group (VODG) = Ururada Mutadawiciinta Kooxaha Naafada ah. whose social care pledge has been signed by well over = kuwaasoo daryeelkooda bulshada ay saxeexeen in ka badan 100 provider organisations supporting over 40,000 people = 100 urur oo adeeg bixiyayaal ah oo taageera in ka badan 40000 oo qof
- British Association of Social Workers = Ururka Britishka ee Shaqaalaha Bulshada
- Royal College of Speech and Language Therapists RCSLT = Kuleejka Royal ee Hadalka iyo Luuqada
- The Learning Disability Professional Senate = Golaha Waxbarashada Naafanimada includes NHS England, Care Quality Commission, = oo ay ka mid tahay NHS England, Komishanka Daryeelka Tayada Clinical Commissioning Groups, Challenging Behaviour Foundation, Department of Health, Health Education England = Ururada Gudiyada Kiliinikada
- British Association of Music Therapy = Ururka Biriitishka ee Isku Daaweynta Muusiga
- Royal College of Occupational Therapists = Kuleejka Royal ee Daaweynta Shaqada
- British Dietetics Association = Ururka Biriitishka ee Isku dheeli tirka cuntooyinka
- British Association of Art Therapy = Ururka Biriitishka ee Isku Daaweynta Farshaxanka
- British Association of Dance Therapy = Ururka Biriitishka ee Isku daaweynta ee dhaansiga/qoob ka ciyaarka
- British Association of Drama Therapy = Ururka Biriitishk ee Isku Daaweynta qaabka Ruwaayadaha
- British Association of Art Therapy = Ururka Biriitishka ee Isku Daaweynta Farshaxanka
- More partners are being added = Wada hawl-galayaal badan ayaa lagu darayaa



Waxii macluumaad dheeraad ah

Booqo www.england.nhs.uk/stomp
pr partner websaydka

Caawimaad dheeraad ah

Waydii dhakhtarkaaga dib u eegis daawada ah ama baadhis caafimaad sanadle ah. Dhakhtarkaaga ama kalkaaliso ayaa sidoo kale kaa caawin karta helitaanka taageero dheeraad ah.

Bixiyayaasha Daryeelka Bulshada-ayaa ku lug leh halkan
www.vodg.org.uk/campaigns/stompcampaign

Talooyin kale iyo macluumaad

Hay, ada ama Muasasada Caqabadaha Habdhaqanka (CBF)

Laynka Taageerada Goyska **0300 666 0126**

Monday-Thursday 9am-5pm, Friday 9am-3pm

Tilmaamaha Daawooyinka loogu talagalay Goysaska ee yaala CBF
websaydka: www.challengingbehaviour.org.uk

Mencap

Laynka Taageerada **0808 808 1111**, maalmaha usbuuca 9am-6pm

Websaydka: www.mencap.org.uk

Bulshada Autismka ee Heer Qaran

Laynka Taageerada **0808 800 4104**, maalmaha usbuuca 10am-4pm

Websaydka: www.autism.org.uk/helpline

Mahad naq badan waxa iska leh **MiXit** ee taageeradooda ay siiyeen **STOMP** iyo warqad yarahan. Iyo dhamaan dadka kale ee ku jira warqad yarahan.

Naqshadayntii **See Communications CIC**

www.see-communications.co.uk

Sawiradii Photosymbols iyo MiXit



STOMP

NHS

see
communications